# Golaha Wakiiladda

## WAAXDA SHURUUCDA, HADAL-QORAALKA IYO FADHIYADA

**Kal-fadhigii 45aad fadhigii ---aad**

***Arbaca, 17 March 2021***

**Quraanka: -** Md. Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Doodda Xeerka Shirkadaha Ganaciga Aagga Cashuuraha Ka-caagan.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid:-** Gudoonka, Mudanayaasha Golaha, marti-sharafa iyo Saxaafada dhamaan waxaan idinku salamaaya Salaanta Islaamka ASC, bacda salaam, Xeerkani siduu u dhigan yahay ee Shirkadaha iyo Hay'addu u macaamilayaan, wuxuu Xeerku u soo dhigay in la assaasayo shirkado ka ganacsanaya oo hay'adda dakaduhu assaasayso oo hay'addaasi aad ugu xilsaaran tahay, **marka anigu halka waxaan soo jeedinayaa "in aanay Hay'adda dakaduhu assaasine shirkadaha ganacsiga ee jira inay hay'addu diiwaangaliso laakiin assaaska shirkadu lagu assaaso xeerkii shirkadaha Somaliland oo isagu jira"** Marka hadii jirtay, hadii aanay jirina inta lagu assaaso Xeerkaas shirkadaha ka dibna hay'addu tii jirtay iyo tan la assaasayba u diiwaangaliso sidii aagaas ganacsiga cashuuraha ka caagan ay ganacsan lahaayeen.

Magaca Xeerka, anigu Magaca Xeerka waxaan u dhigay sidan **"Xeerka Shirkadaha Ganacsiga Aagga Cashuuraha ka-caagan Xeer Lr. Xx/2021"** hadii la soo gaabsan karo Xeerka Shirkadaha Aagga Cashuuraha Ka-caagan.

Xeerkan bogagiisu ma lambarsana oo malaha **"Page Number"** tusmo dhowr bayj ahina way ku jirtaayo aan bayjka ay ku qoran yihiin aanay tilmaameyn, marka Xeerku bayj lambar ha yeesho tusmadu ha tilmaanto bayjka lambarka. Sidoo kale Xeerarku markay Golaha soo galaan afsomaligooda ha la soo saxo oo Xoghaynta ama cidda soo qortay ha soo saxdo waao ceebay inagu tahay xeerar khaldan oo ajaanibku marku arko Xeerkii iyo hab-qoraalkii aanay is-waafaqsanayn, marka ceebay inagu tahay oo qaranka ku tahayo waa in la iska saxo hab-qoraalada Xeerarka.

**Qodobka 4aad Farqadiisa 3aad** ee u dhigan sidan "mid kasta oo ka mid ah meheradaha iyo shirkadaha Aagga Ganacsiga Cashuuraha ka-caagan ee loo assaaso si waafaqsan Xeerkan waxay yeelanayaan shakhsiyad qaanuuniya oo ka madax-banaan saamaylayaasha oo dhan" Marka anigu ereyga **saamaylayaasha** waxaan ku waafqsanahay siday Gudiddu u soo dhigtay ee **Saamileyda.**

Taas markaan ka imaado sidaan u hore u sheegay Shirkadaha waxa assaasaya Xeerkii Shirkadaha, marka taas ma waafaqsana farqadani oo waxaad moodaa in Aagga Ganacsigu uu shirkado cusub iska diiwaangashanayo oo halka ku assaasayo, marka anigu halkaas assaasida diiwaangalin ha loo badalo oo inay diiwaangaliyaan shirkadaha assaasan ee Xeerkii Shirkadaha lagu assaasay bay diiwaangalinayaan, hadaan sidaa la yeelin waxa iswaydaaranaya tusaale, Xeer-ilaalinta iyo Wasaarada Ganacsigu door bay ku leeyihiin Shirkad kasta oo la assaasayo, xata Magaca oo qudha ayaa khatara oo inuu hore u jiray bay eegayaan oo hadii magacu ama qayb ka mid ahi wuu waafaqo mid hore u jirey waa laga diidayaa, marka hadii hay'addii aaggu ay halka shirkad cusub ka diiwaangaliso macayadii la isu eegayay way is-khilaafayaan oo shirkado isku magac ah oo hadana dad ah baa soo baxaya, sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa in assaaska Shirkadaha oo dhan loo celiyo cidii Xeerarku ay siiyeen sida Xeerka Shirkadaha, hay'adduna Diiwaangaliso.

**Qodobka 6aad Farqadiisa 3aad** waxaan soo jeedinayaa halka loo assaaso laga dhig loo diiwaangaliyo waxayna noqoneysaa sidan "**Wareejinta goobta xafiiska diiwaangashan ee aagga cashuuraha Ka-caagan loo wareejinayo aag kale oo cashuuraha Kacaagan ma yeelanayso saamayn ah in si shirkad cusub Diiwaangaliyo, waxes lagama maarmaan ah in wareejintaas loo maro nidaamka maamul ee ay hay'aadu dejisay ee lagu faah-faahiyay Xeer-nidaamiyaha**"

**Qodobka 7aad Farqada 1aad** oo sheegaya in shirkadaha ganacsi ee iska diiwaangaliya hay'adu yeesheen shakhsiyad qaanuuni ah markay is-diiwaangaliyeen, waxay iyana khilaafaysaa sidii aan soo sheegay oo marka lagu assaasay xeerka shirkadaha ay yeelatay, marka waxaan soo jeedinayaa in farqadaas sidan loo dhigo **"Meherad ama shirkad ganacsi ee dooneysa inay isu-diiwaangaliso meherad ama shirkad ganacsi ee aagga ganacsiga cashuuraha ka-caagan waa inay marka horeba ahaato meherad ama shirkad ku assaasan Xeerka shirkadaha Somaliland"**

**Isla Qodobka 7aad Farqadiisa 2aad** oo sheegaysa in habraacyada iyo shuruudaha dastuurka iyo xeer-hoosaadyada shirkadaha loo raaco xeer-nidaamiyaha hay'adda, waxaan u arkaa in hab-raacyada iyo shuruudaha assaaska shirkadeed xeer-hoosaadkeeda loo raacayat Xeerka Shirkadaha, farqadana looma baahna inay qeexdo hab-raaac loo raacayo diiwaangalinta shirkada iska diiwaangalinaysa hay'adda oo hay'addu iyadu habraaca ha dhigayo oo xeer-nidaamiye ha ku soo saarato, sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa in F2aad ee Qodobkan laga dhigo sidan "**Diiwaangalinta meherad ama shirkad ganacsi loo diiwaangalinayo aagga ganacsi ee cashuuraha ka-caagan waxa loo raacaya xeer-nidaamiyaha khuseeya"**

**Qodobka 14aad ee ah Magaca,** magaca shirkad kasta oo la assaasayo waxa loo maraa nidaam xeerka shirkadaha ku cad oo lagu hubinayo inaanu ahayn magac siduu u dhan yahay ama intiisa badani u diiwaangashaneyn shirkad kale oo ka horeysay isaga, sidaa

darteed, waxaan soo jeedinayaa in Qodobka 14aad gabi ahaantiisaba laga saaro Xeerka, waayo Xeerkii Shirkadaha ayuu ku qoran yahay magaca shirkadaha iyo sida loo doonayo ama magaceeda loo qaadanayo, in halkan lagu soo celiyo oo laga eego registerkan yar ee yaala aaggaa cashuuraha ka-caagan wuxuu dhibaato u keenayo shirkadihii hore u jiray iyo kuwo la assaasayo, marka qodobkaas 14aad gabigiisaba ha laga saaro Xeerkan.

**Qodobka 15aad ee ah Laan Shirkadeed (branch office**) siduu u dhigan yahay waxaan soo jeedinayaa in loo badalo **"meherad ama shirkad aagga ganacsi ee cashuuraha ka-caagan waxay laan ka furan karta aag ganaci oo kale oo cashuuraha ka-caagan oo ku yaala Somaliland ama dal kale si waafaqsan Xeerkan ama Xeer-nidaamiyaha ka dheegma"** marka qaabkii shirkadu qaabkii ay meel kale isaga diiwaangalin lahayd waa in xeer-nidaamiyahaasi uu jideeyaa.

**Qodobka 17aad Liisan** halkaana sidii hore ayaan erayga **Assaaska** waxaan ku badalay "**Diiwaangalin"** oo uu noqdo codsiga diiwaangalinta.

**Qodobka 18aad** iyo **Qodobka 20aad Farqadiisa 1aad** sidoo kale ereyga Assaasida ayaan "**Diiwaangalin"** ku badalay.

**Qodobka 21aad Farqada "C"** waxa ku jira khalad hab-qoraal, waxaan soo jeedinayaa in Farqadaas C loo qoro sidan **"inuu la darajo yahay saamileyda kale ee ay saamiyada isku midka ah ku leeyihiin shirkad"**

**Qodobka 22aad** Ciwaankiisaa waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo "**Raasamaalka Shirkadda"** oo laga saaro kalmada saamiga.

Isla **Qodobkaas 22aad Farqadiisa 3aad** halka ah la assaaso ayaan u badalay **"la diiwaangaliyo".**

**Qodobka 31aad Farqadiisa 4aad** erayga ku qoran ee **shufcada** oo malaha carabi ka timi waxaan hore u aqaanay muu ahayn, xeerarkana waxa lagu qora wax qof waliba garanayo, marka waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo **"Xeerka shirkadu wuxuu dhigi karaa qodob saamileyda shirkada siinaya xaqa xuquuq-iibsashada saamiga shirkada ee la wareejinayo"** waana marka qof saamigii iibinayo xaq koowaad la siiyo saamilayda kale inay iibsato hadii saamileyda cid laga waayo marka cid kale laga iibiyo, marka shufcad waxay ujeedaan xaq iibsashada.

**Qodobka 57aad** ee Shirarka Gudidda Agaasinka **Farqadiisa 4aad** qaybta Af-somaliga iyo qaybta Af-ingiriisigu isma waafaqsana, qaybta Af-ingiriisigu waxay sheegaysaa in shir kasta oo Gudidda Agaasinku yeelanayso lagu doorta Gudoomiyaha Shirka, waa shir kasta, halka qaybta Af-somaligu sheegayo in aanay mudo siin ee Gudoomiyaha la doorto uun mudo go'an oo uu xilka haynayo may sheegin, **marka anigu waxaan soo jeedinayaa in la is waafajiyo oo waliba la cayimo mudada gudoomiyaha lagana dhigo muddo 2 sanno ah halka shir walba laga dooranayo.**

**Qodobka 74aad e**e magaca meherada ganaciga waxa ku qoran FZE taas oo eray-bixintana lagu qeexin oo ku jirin halkana lagu faah-faahin, marka maxay noqoneysaa FZE oo looga jeedaa waa in la cadeeyo, **waxa loola jeedaa free zone establishment, laakiin in looga jeedo halkee lagu sheegay oo lagu garanayaa in loo soo gaabshay, ilaa aad la akhrido qaybtiisa Af-ingiriisiga lama garanayo meel laga keenay, marka waxaan soo jeedinayaa in iyadoo la** Af-somaligareeyay lagu qoro qaybta Af-somaliga oo hadii la doono wixii ka dambeeya iyadoo la soo gaabiyay baraakat la galiyo, qaybta Af-ingiriisiga ereydii oo ka taagnaayeen ee **free zone establishment** oo loo soo gaabiyay "**FZE"** baraakadka hala galiyo, qaybta Af-somaliga ha laga dhigo **meherad aagga ganacsiga ka-caagan**" oo meherad waliba magaceeda intaas xaga dambe ka raacod.

**Qodobka 82aad** ee Aassaasida Waaxda Diiwaangalinta, waxaan soo jeedinayaa in Masuuliyadeeda lagu cadeeyo oo laga **dhigo "oo Masuuliyadeedu tahay Diiwaangalinta Shirkadaha Ganacsiga Aagga Cashuuraha ka-caagan"**

Intaas ayaan ka gaadhay oo ilaa toboneeyo qodob baa ii hadhsanaa oo aanan wali gaadhin, waxaan filayaa in Mudanayaasha iga dambeeya ka hadlaan, aniguna intaas ayaan kaga baxay, WSC.